



Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Febraayo 17, 2022

Ku socota: Shaqaalaha ODDS iyo Hawl wadaagayaasha
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka
Ujeedada: Ra'yi ururinta isku-doodista ee loogu talagalay fursada maalganeed ee soo socda

Waxaan ku faraxsanahay in aan idinla wadaago in aanu hayno \$500,000 oo ah deeqda lacageed ee Xeerka Qorshaha Samata-bixinta Maraykanka (ARPA) si la iskugu abaalmariyo hadafka ah wagaajinta isku-doodista ee Oregon dhexdeeda. Waxaan jeclaan lahayn fikrado ka socda dadka u dooda naftooda, ururada dadka u dooda naftooda, qoysaska, hay'adaha maamulka kiiska, iyo daneeyayaasha kale si ay nooga caawiyaan go'aaminta sida ugu wanaagsan ee loo isticmaalo maalgelintani si loo gaaro natiijooyinkani.

Fadlan naga caawi ra'yi ururintani kooban sida ugu dheer uguna ballaaran ee suurtagalka ah adiga oo la wadaagaya qof kasta oo aad u malaynayso in uu rabo bixinta jawaab celintiisa. Ra'yi ururintani waxaa laga heli karaa meeshan la sii gelayo 'link': <https://forms.office.com/g/kJ9yN9NESW>. Waqtiga loo qabtay in lagu dhammeystiro ra'yi ururintu waa Maarso 11, 2022.

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan deeqda lacageed ee ARPA ee aanu leenahay, fadlan email u dir ODDSARPA.funding@dhsosha.state.or.us.

Waxaan kuu soo horumarinaynaa mahad celin la xiriirta buuxinta iyo wadaagista ra'yi ururintani muhiimka ah.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Fariintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
[http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-
DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx](http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx)

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan iyo ra'yi ururintani oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.